DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند
الصومالية

# GUDDIGA DIFAACA DOWLADDA PUNTLAND.

05/23/2018

Go'aamo ka soo baxay Guddiga Difaaca Dowladda Puntland.

Guddigu wuxuu soo saaray Awaamir tan hoos ku qoran:

1. Waxaa lagu wargelinayaa shacabka reer Puntland in Dawladda Puntland ay ka go'an tahay xoreynta Gobolka Sool

2. Aragti kasta oo kasoo horjeeda Puntland midnimadeeda, wadajirkeeda iyo xoreynteeda waa danbi qaran, cidii aaminsana waxaa loo aqoosanayaa u gargaare cadow, sidaa daraadeed waxa lagu qaadayaa xeerka ceqaabta.

3. Hub kasta oo ku sifoobey ama loo arko inuu lid ku yahay xoraynta dhulka maqan, wuxuu la mid noqonayaa hubka cadowga,

4. Taliye, ciidan iyo masuul kasta oo xil ka haya maamulka Hargeysa oo ka soo baxa mudada howlgalka wuxuu mutaysanayaa abaal marin.

5. Qof kasta oo ka soo jeeda deegaamada Puntland oo u shaqeeya maamulka Hargeysa, kana tanaasuli waaya hagardaamada iyo waxyeellada, shacabka reer Puntland wuxuu mudanayaa xeerka ciqaabta Puntland.

6. Qof kasta oo cadowga Puntland qariya, ama gabbaad siiya isagoo ujeedadiisu tahay in lagu wax-yeelleeyo shacabka iyo Dowladda Puntland, qofkaas wuxuu la dembi yahay cadowga uu qariyey wuxuna ku sifoobayaa cadow, waxaana lala tiigsanayaa sharciga.

7. Qof kasta oo gacan siiya qof u shaqeeya maamulka Hargeysa oo ay ku cadaato khiyaamo, jaajuusnimo ama siin xog waa dil aan lahayn mag.

8. Malaha mag ama godob, taliyaha, Askariga ama Masuulka kasoo jeeda Gobollada Puntland oo lagu dilo dagaalka isagoo u diriraya maamulka Hargeysa

9. Hanti kasta oo uu leeyahay qof reer Puntland ah oo loogu shaqeynayo maamulka Hargeysa waxaa la wareegaya Dowladda Puntland.

10. Maxkamada ciidamadu waxay waajib keeda ka gudanaysaa cidkasta oo faldambiyeed ka geysta goobta dagaalka sida dhac, kufsi, amar diido, dil loo gesyto dad rayid ah ama cid kale oo ka tirsan ciidamada iyo iwm ah.

11. Dawladda Puntland waxay caddeynaysaa in aysan cadow ku ahayn shacabka ku nool gobolada waqooji galbeed Soomaaliya nabad-galyadooda iyo jiritaan kooda, isla markaana waxay soo dhaweynaysaa cid kasta oo doonaysa xoojinta wadajirka umadda Soomaaliyeed iyo xasiloonideeda.